Gunooyinka Carruurta Naafada ah

Miiska ku jira

Horudhac	1
Qarashaadka Supplemental Security Income (SSI) ee lasiiyo carruurta naafada ah	2
Social Security Disability Insurance (SSDI) gunooyinka lasiiyo dadka waawayn ee naafada ahaa ilaa caruurnimadoodii	4
Codsiga qarashaadka SSI ama gunooyinka SSDI iyo sida aad gacanta uga gaysan karto	5
Barnaamijyada taageerada shaqada ee dadka yaryar ee naafada ah	5
Medicaid iyo Medicare	6
Children's Health Insurance Program	7
Adeegyada kale ee daryeelka caafimaadka	7
La Xiriirka Lambarka Bulshada	7

Horudhac

Buuggaan waxaa loogu talagalay waalidiinta, daryeelayaasha, ama wakiilada carruurta kayar da'da 18 sano kuwaasoo ah kuwo naafo ah taasoo kadhigaysa inay xaq uyeeshaan Qarashaadka Supplemental Security Income (SSI). Waxay sidoo kale qusaysaa dadka qaan gaarka ah kuwaasoo naafada noqday markay carruurta ahaayeen (kahor intay jireen da'da 22), kuwaaso xaq uyeelan kara gunooyinka Social Security Disability Insurance (SSDI). (Waxaan ugu yeernaa tan SSDI gunada "carruurta" sababta oo ah waxaa lagu bixiyaa cadadka lacageed ee waalidku kuhelaan diiwaanka Social Security.)

Buuggaan ayaa kaacaawinaaya inaad go'aansato haddii adiga, cunugaaga, ama cunug aad taqaano, uu xaq uyeelan karo SSI ama Social Security.

Qarashaadka Supplemental Security Income (SSI) ee lasiiyo carruurta naafada ah

SSI waxay qarashaad bile ah siisaa dadka danyarta ah ilahooduna kooban yihiin kuwaasoo jira da'da 65 sano ama kawayn, ama indho la'a, ama naafada ah. Cunugaaga, haduu kayaryahay 18 sano xaq ayuu uyeelan karaa haddii asaga ama ayadu ay qabto dhibaato dhanka jirka ama maxkaxda ah, ama labadaba, taasoo waafaqsan qeexitaanka naafada ee adeegga Social Security's ee carruurta naafada ah, iyo hadii qarashka ama ilaha dhaqaale ee uu helo ay kujiraan cadadka qofku xaqa ugu yeesho. Cadadka lacageed ee laga siinaayo SSI way kaladuwanyihiin gobalba gobalka kale waayo gobalada qaar ayaa ku kordhiya qarashka SSI. Xaafiiskaaga Social Security ee maxaliga ah ayaa macluumaad badan kaa siin kara qarashaadka guud ee gobalkaagu kubixiyo SSI.

Sharciyada SSI ee laxiriira dhaqaalaha iyo ilaha qofka

Waxaan eegnaa dhaqaalaha iyo ilaha cunugaagu helo kahor inta aanaan go'aan kagaarin inuu uqalmo SSI. Waxaan sidoo kale eegnaa dhaqaalaha iyo ilaha qoyska dadka cunuga lanool helaan. Shuruucdaan waxay kuqabanayaan haddii cunugaagu guriga kunoolyahay. Sidoo kale waxay qabanayaan haddii uu iskuulka joogo laakiin uu guriga imaado mararka qaar aadna adigu maamusho.

Haddii dhaqaalaha iyo ilaha cunugaaga, ama dhaqaalaha ay helaan dadka kale ee qoyskiisa kamid ah, ay kabadan yihiin cadadka la ogolyahay, waan diidaynaa codsiga cunugu uu kudalbanaayo lacagaha SSI.

Waxaan kukoobnaa lacagta SSI cadad dhan $30 marka cunugu joogo xarun caafimaad, caymiska caafimaadkuna bixiyo daryeelkiisa.

Shuruucda SSI ee naafada laxiriirta

Cunugaagu waa inuu buuxshaa dhammaan shuruudaha soosocda si loogu aqoonsado mid naafo ah uuna, sidaas awgeed, xaq ugu yeesho SSI:

- Cunuga, aan indhoolka ahayn, waa inuusan shaqaynayn ama helin lacag kabadan $1,180 bishiiba sanadka 2018. Cunuga indhoolka ah waa inuusan shaqaynayn ama uusan helayn lacag kabadan $1,970 (cadadkaan lacageed sanad kasta way isbadashaa caadiyan.)
- Cunugaan waa inuu qabaa dhibaato dhanka jirka ama dhimirka ah, ama labadaba, taasoo keenaysa in "lagu asteeyo mid daran oo caqabad ku ah hawlihiisa." Tani waxay kadhigantahay in dhibaatooyinka ay qasab tahay inay si ba'an uxanibaan hawlaha shaqo ee cunuga.
- Xaalada cunuga waa inay tahay mid naafaysay, ama loo arko mid naafo ah, mudo ugu yaraan 12 bilood ah; ama xaaladihiisa xanuunku waa in ay yihiin kuwo dhimasho keeni kara.

Bixinta macluumaad ku aadan xaalada cunugaaga

Markaad codsato qarashaadka SSI oo cunugaaga lasiiyo adoo raacayaa xaaladiisa naafonimo, waxaan kaadalbanaynaa macluumaad faahfaahsan oo ku aadan xaalada caafimaad ee cunugaaga iyo sida ay usaamaynayso awoodiisa hawleed. Waxaan sidoo kale kaadalbanaynaa inaad ufasaxdo dhakhaatiirta, macalimiinta, baarayasha caafimaadka, iyo xirfadlayaasha kale ee cunugaaga macluumaadka kahaya inay macluumaadkaas noosoo diraan.

Haddii aad hayso wax kamid ah diiwaanada cunuga ee dugsiga ama isbitaalka, fadlan sooqaad. Tani waxay gacan kagaysanaysaa hawsha go'aan gaarista.

Maxaa dhacaaya marka xiga?

Waxaan udiraynaa dhamaan macluumaadka aad nasiiso Disability Determination Services(DDS) xafiiska ay kuleeyihiin gobalkaaga. Dhakhaatiirta iyo shaqaalaha kale ee tababaran ee wakaalada gobalkaas ayaa dulmar kusamaynaaya macluumaadka, kadibna dalbanaaya diiwaanada caafimaadka iyo dugsiga ee cunugaaga, iyo macluumaadkasta kale si loo go'aansho in cunugaagu buuxshay iyo in kale shuruudaheena naafonimada.

Haddii wakaalada gobalku aysan go'aamin karin naafonimada ayadoo adeegsanaysa kaliya macluumaadkiisa caafimaadka, diiwaankiisa dugsiga, iyo xaqiiqooyinka kale ee ay haystaan, waxay kaadalban karaan inaad cunugaaga gayso baaritaan ama tijaabo caafimaad. Anaga ayaa dhiibayna lacagta baaritaanka.

Waxaan siin karnaa cunugaaga qarashaadka SSI oo degdeg ah

Wakaalada gobalka waxay ku qaadataa sadex ilaa shan bilood inay go'aamiso in cunugaagu uqalmo shuruudaheena naafonimada. Hase yeeshee, xaalado caafimaad awgood, waxaan bixinaa qarashaadka SSI isla markaba, iyo mudo ilaa lix bilood ah, inta wakaalada gobalku kugu aaminayso in cunugaagu xaq uleeyahay adeegyada naafada.

Kuwaan soosocda waa *qaar* kamid ah shuruudaha uu kubuuxinkaro:

- Indho la'aan buuxda
- Dhago la'aan buuxda
- Xanuunka lawlawga
- Dhaadhaanimo
- Murqo dhaq
- Naafonimo dhanka garashada ah oo daran (cunuga jira 4 ama kawayn)
- Infakshanka HIV oo heerka labaad ah
- Miisanka uu cunugu kudhasho oo kahooseeya 2 pounds, 10 ounces — Waxaan qiimaynaa carruurta miisaanka ay kudhashaan yaryahay laga bilaabo markay dhashaan ilaa da'da 1 kadibna kori waayay laga bilaabo markuu dhashay ilaa da'da 3 sano. Waxaan u adeegsanaa miisaanka dhalashada ee cunuga sida uu kuqoran shahaadadii asalka ahayd ama nuqul sharci ah oo dhalashada cunuga ah ama sida kuqoran diiwaanka caafimaadka ee uu saxiixay dhakhtarka jirku.

Haddii cunugaagu haysto mid kamid ah sababaha uqalmida, wuxuu helayaa qarashaadka SSI isla markaba. Haddii wakaalada gobalku si gabi ahaanba ah ugo'aamiso in naafonimada cunugaagu aysan wax wayn ahayn si uu uhelo SSI, lagaama rabo inaad sooceliso lacagtii SSI ee cunugaaga lasiiyay.

Qiimayn lagu sameeyo SSI

Kadib marka cunugaagu bilaabo qaadashada lacagaha SSI, sharciga ayaa naga doonaaya inaan lasocono xaalada caafimaad ee cunugaaga waqtiba waqtiga kadanbeeya si looxaqiijiyo in naafonimadiisa wali waafaqsantahay shuruudaheena. Waa inaan samaynaa qiimayntaan:

- Ugu yaraan mudo sadex sano ah carruurta kayar da'da 18s sano kuwaasoo lafilaayo in xaaladooda sooroonaato; iyo
- Da'da 1 ee caruurta qaata lacagaha SSI sababo laxiriiro inay kudhasheen dhicisnimo. Haddii aan go'aamino in xaaladooda caafimaad aysan soo hagaagayn marka lagaaro sanad kadib dhalashadooda, waxaan dulmarka kusamaynaynaa taariikh danbe.

Waan samaynaynaa dulmarka naafonimada xataa haddii cunugaaga aan lafilayn in xaaladiisu soo hagaagto. Markaan samayno dulmarka, waa inaad keentaa cadayn muujinaysa in xaalado naafonimo ee cunugaaga ay wali caqabad wayn kutahay hawl maalmeedkiisa cunugaaguna uuqaadanaayay daawo caafimaad oo muhiim u ah xaaladiisa caafimaad.

Maxaa dhacaaya marka cunugaagu gaaro da'da 18

Barnaamijka SSI, cunugu wuxuu kuqayngaaraa da'da 18 sano, waxaana isticmaalnaa shuruucda dhan ee caafimaadka iyo kuwo aan caafimaadka ahayn markaan go'aaminayno in qof wayn uuheli karo qarashaadka SSI ee naafada. Tusaale, maxisaabino qarashaadka soogala xubnaha qoyska, marka laga reebo dadka isqaba, markaan go'aaminayno in qof wayn uu xaq uleeyahay dhibatooyinka dhaqaale ee uu kuhelaayo caawimaada SSI. Waxaan kaliya xisaabinaa qarashka qofka wayn iyo lamaanaha isqaba. Waxaan sidoo kale isticmaalnaa shuruucda naafonimada ee dadka waawayn markaan go'aaminayno in qof wayn uu naafo yahay.

- Haddii cunugaagu horay uqaadanaayay qarashaadka SSI, waa inaan dulmar kusamaynaa xaaladaha caafimaad ee cunuga markuu gaaro 18 sano. Waxaan dulmarkaan samaynaa inta lagu jiro sanadka cunugaaga uu ubilaabato da'da18aad ee dhashadiisa. Waxaan isitcmaalnaa shuruucda naafonimada ee dadka waawayn si aan ugo'aamino in cunugaagu 18 sano jirka ah uu xaq uleeyahay SSI.
- Xataa haddii aan cunugaagu xaq ulahayn SSI kahor intuusan gaarin da'da 18aad ee dhalashadiisa sababo laxiriira in adiga iyo xaaskaagu aad lacag badan haysateen ama ilo badan idin soogali jireen, cunugu wuxuu xaq uyeelan karaa qarashaadka SSI markuu gaaro da'da 18.

Wixii macluumaad dheeri ah ka akhri *Supplemental Security Income (SSI)* (Daabacaada lambarkeedu yahay. 05-11000-SO).

Social Security Disability Insurance (SSDI) gunooyinka lasiiyo dadka waawayn ee naafada ahaa ilaa caruurnimadoodii

Barnaamijka SSDI ayaa siiya gunooyin dadka waawayn ee naafada ahaa taasoo soobilaabatay kahor intaysan gaarin da'da 22 sano. Waxaan u aqoonsanaa tan SSDI gunada "carruurta" waayo waxaa lagu bixiyaa cadadka lacageed ee waalidku kuhelaan diiwaanka Social Security.

Si qofka wayn ee naafada ah loogu aqoonsado gunada "carruurta", mid kamid ah waalidiintiisa:

- Waa inuu helaa gunooyinka Social Security ee hawlgabka ama aafada; ama
- Waa inuu dhintay uuna shaqeeyay mudo kufilan si uu xaq uyeesho caawimaada Social Security.

Gunoyinkaan waxaa sidoo kale lasiin karaa dadka waawayn haddii qofkaas uu naafo ahaa markuu gaaray da'da 18 sano, hadeey helayeen gunooyinka dadka kutiirsan waalidka ee lacagaha waalidka laga siiyo diiwaanka mushaaraadka ee Social Security kahor intuusan qofkaasi gaarin da'da 18 sano jir. Carruurta qaadanaayay gunooyinka markay yaraayeen kuna helaayay diiwaanka mushaarka waalidka ee laga siin jiray Social Security ayaa xaq uyeelan kara inay siiwataan helitaanka gunooyinka ay kuqaadan jireen diiwaankaas waalidkood markay gaaraan da'da 18 sano jir haddii carruurtaasu naafo yihiin. Waxaan gaarnaa go'aanka naafonimada anagoo adeegsanayna shuruucda naafonimada ee dadka waawayn.

Gunooyinka SSDI dadka waawayn ee naafada ah e qaata caawimaada "carruurta" waa loosii wadayaa ilaa inta qofkaas naafo yahay. Guurka qofka wayn ee ahaa "curruurta" naafada ah ayaa saamayn kuyeelan kara xaqa uu leeyahay gunadiisa. Cunugaagu uma baahna inuu shaqeeyo si uu uhelo gunooyinkaas.

Sidee ayaan kugo'aaminaynaa "cunugaagu" naafo yahay uuna xaq uleeyahay gunooyinka SSDI

Haddii cunugaagu jiro da'da 18 sano ama kawayn, waxaan qiimaynaynaa naafonimadiisa isla sida aan kugo'aamino naafonimada qofkasta oo qaangaar ah. Waxaan codsiga udirnaa Disability Determination Services ee gobalkaaga kuwaaso nasoo sameya go'aanka naafonimada. Si aad uhesho macluumaad faahfaahsan oo kusaabsan sida aan kugo'aamino naafonimada dadka waawayn, ka akhri *Gunooyinka Naafada* (*Disability Benefits*) (Daabacaada lambarkeedu yahay. 05-10029-SO).

Codsiga qarashaadka SSI ama gunooyinka SSDI iyo sida aad gacanta uga gaysan karto

Waxaad codsan kartaa qarashaadka SSI ama gunooyinka SSDI ee cunugaaga adoo wacaaya laynka Social Security ee lacag la'aanta ah kaaso ah **1-800-772-1213** ama adoo booqanaaya xafiiska Social Security ee deegaankaaga. Hadaad cunugaaga udalbayso qarashaadka SSI, waa inaad haysataa nambarkiisa Social Security iyo shahaadadiisa dhalashada. Haddii aad cunugaaga udalbaysid gunooyinka SSDI adoo karaacaaya diiwaankaaga mushaaraadka, fadlan sooqaado lambarkaaga Social Security, ama lambarka Social Security ee waalidka shaqo gabka ah, naafada ah, ama dhintay kaasoo codsigiisa diiwaanka SSDI lagu buuxshay, oo ay lasocdaan lambarka Social Security iyo shahaadada dhalashada ee cunuga.

Waxaad naga caawin kartaa gaarista go'aan adoo:

- Noosheegaaya waxwalba oo aad ka ogtahay cunugaaga xaaladihiisa caafimaad;
- Adoo nasiinaaya taariikhaha uu booqday dhakhaatiirta ama isbitaalada lageeyay, lambarka koontada bukaanka ee uu kahaysto dhakhaatiirta ama isbitaal kasta, iyo macluumaad kasta oo kale kaasoo naga caawinaaya helitaanka diiwaanada caafimaad ee cunugaaga; iyo
- Adoo nasiinaaya nuqulada warbixino kasta oo caafimaad ama warbixino oo aad haysato.

FIIRO GAAR AH: *Uma baahnid inaad macluumaad kadalbato dhakhaatiirta cunugaaga. Anaga ayaa toos ula xiriirayna si ay noosiiyaan warbixino ama macluumaadka aan ubaahanahay si aan go'aan uga gaarno naafonimada cunugaaga.*

Haddii cunugaaga kayaryahay da'da 18 sano aadna udalbayso SSI, waa inaad keentaa diiwaanada muujinaaya dhaqaalaha iyo ilaha dhaaqaluhu kaasoo galo, iyo sdoo kale kuwa cunugaaga. Waxaan sidoo kale kuwaydiisanaynaa inaad faahfaahiso sida naafonimada cunugaagu usaamayso hawlihiisa nolol maalmeedka. Waxaa siidheer, waxaan kuwaydiinaynaa magacyada macalimiinta, daryeel bixiyaasha maalintii, iyo xubanaha qoyska kuwaasoo macluumaad kabixin kara sida cunuga xaalkiisu yahay. Haddii aad haysato diiwaanada dugsiga, waa inaad keentaa goobta waraysiga.

Bulshooyin badan, balamo gaar ah ayaa laladhigtaa dhakhaatiirta caafimaadka, wakaaladaha adeegga bulshada, iyo dugsiyada si ay nooga caawiyaan helitaanka cadaynta aan ubaahanahay si aan ubaarno codsiga cunugaaga. Wadashaqaynta aad kukeenayso diiwaanada iyo macluumaadka kale, dhanka kale, waxay naga caawinaysaa inaan shaqadeena kudhamayno si dhakhso ah.

Barnaamijyada taageerada shaqada ee dadka yaryar ee naafada ah

Waxaa jira qaabab badan oo aan kudhiiri galino dadka da'da yar ee hela qarashaadka SSI ama gunoyinka SSDI kuwaasoo raba inay shaqaystaan.

Caawimaada SSI:

- Markaan go'aamino qarashka bishii ee cunugaaga kahelo SSI, maxisaabino inta badan dhaqaalaha cunugaaga. Haddii cunugaagu kayaryahay da'da 22 sano, uuna yahay arday oo dugsiga si joogto ah utaga, waxaan iskadhaafnaa qarashaadka uu helo qaybo badan oo kamid ah qarashaadka bishii soogala. Sanadkaan 2018, ardayda naafada ah ee kayar da'da 22 sano waxaa laga reebayaa xisaabinta lacag dhan $1,820 oo ah qarashka bishii soogala, taasoo sanadkii kuxadaysan $7,350, marka aan xisaabinayno dhaqaalahooda laxiriira SSI. Cadadkaan kooban way kordhi karaan sanadkasta.
- Ayadoo laraacaayo barnaamijka Plan to Achieve Self-Support (PASS), cunuga da'diisa tahay 15 sano ama kawayn ayaa kaydsan kara xoogaa lacago oo iskaga bixiyo waxbarashada iyo waxyaabaha kale uu ugu baahanyahay inuu shaqeeyo. Maxisaabino lacagaha uu kaydsaday markaan go'aaminayno qarashaadka cunugaaga ee laxiriira SSI. Maxisaabino dhaqaalaha lakaydiyay iyo ilaha dhaqaale markaan go'aaminayo cadadka lacagta cunugaaga. Maclumaad badan oo kusaabsan PASS ka akhri ***www.socialsecurity.gov/disabilityresearch/wi/pass.htm***.
- Sababo laxiriira xaaladaha caafimaadka, cunugaagu wuxuu ubaahan karaa qalab iyo adeegyo gaar ah si uu ushaqeeyo, sida gaari curyaan ama caawimaad qofkale siiyo. Markaad go'aaminayno qarashaadka SSI ee cunugaaga, maxisaabinayno qaar, ama dhammaan, lacagaha lagu baxsho alaabtaan ama adeegyadaan markaan tirinayno lacagaha soogala cunugaaga.
- Cunugaaga kawayn da'da 15 sano waxaa lasiin karaa caawimaad tababar iyo dhaqancelin ah.
- Qarashaadka ay Medicaid dhiibayso way siisiyaadayaan xataa haddii lacagaha soogala cunugaaga ay badan yihiin ilaa xad laga joojin karo qarashaadka bishii lagu caawiyo ee SSI ilaa qarashaadka soogala ay kahooseeyaan cadad loo astameeyay.

Caawimaada SSDI:

- Qof qaangaar ah oo naafo noqday kahor da'da 22 sano ayaa heli kara isla caawimaada qarashaadka shaqada uga baxa sida kor lagu sharxay ee cunuga qaata caawimaada SSI, iyo caawimaada lagu siinaayo baxnaaninta.
- Qarashaadka gunooyinka ah waa laguusii wadayaa ilaa aad shaqada joojiso. Sanadka 2018, waxaan kuu arkaynaa inaad shaqayso haddii qarashka bishii kusoo galo kabato $1,180 ee dadka aan indhoolaha ahayn ($1,970 haddii aad indhoole tahay).

Waxaad macluumaad dheeri ah oo barnaamijyadaan laxiriira kahelaysaa wargayska oo ah, ***www.socialsecurity.gov***, adoo wacaaya laynka bilaash ah **1-800-772-1213**, ama adoo ka akhrinaaya ***www.socialsecurity.gov/redbook***.

Medicaid iyo Medicare

Medicaid waa barnaamij daryeel caafimaad oo loosameeyo dadka danyarta ah iyo kuwa ilahooda dhaqaale liitaan. Inta badan gobalada, carruurta qaadata qarashaadka SSI waxay xaq uleeyihiin adeegga Medicaid. Gobalo badan, adeegga Medicaid wuxuu si ootamaatig ah qofku kuhelayaa markuu xaq uyeesho adeegga SSI. Gobalada kale, waa inaad dalbataa. Carruurta qaar waxay helikaraan caawimaada Medicaid xataa hadaysan xaq ulahayn SSI. Kahubi xafiiska Social Security ee deegaankaaga, wakaalada Medicaid ee gobalkaaga, ama gobalkaaga ama xafiiska adeegyada bulshada ee gobalkaaga si aad macluumaad dheeri ah uhesho.

Medicarewaa barnaamij heer federal ah oo caymiska caafimaad ah looguna talagalay dadka da'doodu tahay 65 sano jir ama kawayn, iyo dadka qaadanaayay gunooyinka Social Security ee dadka naafada ah ugu yaraan labadii sano ee ugu danbaysay.

Waxaa jira labo arimood oo sharcigaan kabaxsan. Cunugaagu qaangaarka ah ee naafada ah wuxuu heli karaa Medicare si degdeg ah haddii:

- Uu qabo xanuun kalyaha ah oo daran uuna ubaahanyahay in kali lagasho ama kalyo sifayn loosameeyo; ama
- Uu leeyahay adeegga Lou Gehrig's disease (amyotrophic lateral sclerosis).

Children's Health Insurance Program

Children's Health Insurance Program (Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Carruurta) wuxuu usahlayaa gobalada inay caymis caafimaad ufidiyaan carruurta qoysaska shaqeeya oo leh mushaaraadka aadka uga sareeya cadadka ay xaq ugu yeelanayaan adeegga Medicaid, laakiin aad uga hooseeya inay iskabixiyaan caafimaad gaar looleeyahay. Barnaamijkaan wuxuu dhiibayaa qarashaadka daawooyinka kubaxa, kuwa aragga, maqalka, adeegyada caafimaadka dhimirka, waxaana laga heli karaa dhammaan 50 gobal iyo Degmada Columbia. Wakaalada gobalkaaga uqaabilsan Medicaid ayaa macluumaad dheeri ah kabixin karta barnaamijkaan, ama waxaad macluumaad dheeri ah kahelaysaa oo kusaabsan caawimaada carruurtaada bogga ***www.insurekidsnow.gov*** ee interneetka ama adoo wacaaya **1-877-543-7669**.

Adeegyada kale ee daryeelka caafimaadka

Marka cunugaagu qaato SSI, waxaan kuugudbinaynaa meelaha aad daryeelo caafimaad uga heli karto cunugaaga. Adeegyadaan waxaa loogu talagalay Carruurta qaba Baahiyaha Caafimaad ee Gaarka ah sida uu qabo sharciga Social Security Act. Wakaaladaha caafimaadka ee gobalka ayaa caadiyan maamula barnaamijyadaan.

Gobaladu waxay adeegyadaan ugu yeeraan magacyo badan oo kaladuwan, ayna kujiraan Adeegyada Caafimaadka ee Carruurta, Adeegyada Caafimaadka Carruurta, iyo Barnaamijka Carruurta Naafada ah. Barnaamijyada inta badan waxay adeegyada dadka usii mariyaan xarumaha caafimaadka, xafiisyada dadka gaarka ah leeyihiin, xarumaha isbitaalada ee bukaan jiifka iyo bukaan socodka daaweeya, ama wakaaladaha bulshada.

Xataa hadaan cunugaagu helin SSI, mid kamid ah barnaamijyadaan ayaa kucaawin kara. Waaxaha caafimaad ee maxaliga ah, xafiisyada arimaha bulshada, ama isbitaalada ayaa laga doonayaa inay kaacaawiyaan sidaad ula xiriiri lahayd barnaamijka Daryeelka Gaarka ah ee Caafimaadka Carruurta ee maxaliga ah.

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda ***www.socialsecurity.gov***. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;

- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.